



Horumarinta Qorshaha Ka-hortagga Xadgudub Shakhsiyeed (IAPP)

Daryeelka La-caawiyo (ASSISTED LIVING)

Dhammaan dadka deggan goobaha Daryeelka ee Lacaawiyo waxaa sharciga dhigayaa in ay yeeshaan IAPP, xitaa kuwa loo tixgeliyo “guri keliya” (housing only). Hoos waxaa ku qoran dhowr dariiqo oo lagu taliyay oo adeegbixiyeyaasha isticmaali karaan marka ay samaynayaan IAPP-ka oo ay kala shaqaynayaan dadka deggan—gaar ahaan marka qofku muujiyo welwel ku saabsan ka qaybgalka diyaarinta qorshahan.

Waxyaabaha Muhiimka ah ee Maskaxda Lagu Hayo

Aan eegno waxyaabo aan ka ognahay dad badan ee ku nool goobaha Daryeelka La-caawiyo ee Minnesota.

- Qaar ka mid ah dadka deggan waxay ka baqaan in buuxinta IAPP ay muujinayso in ay daciif yihiin ama aanay is maamuli karin. Waxay u arki karaan in arrintani ka hor imanayso sida ay isu arkaan oo ah dad madax-bannaan oo naftooda u maqan.
- Dadka deggan intooda badan waxay ku jiraa marxalad isbeddel nololeed culus, sida ka tagista guryihii ay sannado badan ku noolaayeen, alaabo qiimo u lahayd, hab-nololeedkoodii caadiga ahaa, xayawaanno ay jeclaayeen, ama shabakado bulsheed. Murugo, adkaysi, iyo diidmo waa qayb dabiici ah oo ka mid ah u-wareegidda meel cusub.
- Qaar ayaa u soo guura Daryeelka La-caawiyo iyaga oo aan adeeg doonayn, balse la socda lamaane u baahan daryeel. Sidaa darteed, qofka waxa uu u arki karaa in IAPP-ku aanu khusayn noloshiisa isagoo is leh anigu taageero uma baahani.
- Qaar ka mid ah dadka deggan waxay la tacaalayaan xaalado caafimaad-maskaxeed (la ogyahay ama aan la ogeyn), kuwaas oo saamayn kara fahamkooda, sida ay ula hadlaan dadka kale, iyo sida ay diyaar u yihiin ka-qaybgalka IAPP. Xaaladahan waxay kaloo keeni karaan in ay si xasaasi ah uga falceliyaan su’aalaha ku saabsan amniga, khatarta ama suurtagalnimada tacaddiga.

Muhiimadda Luuqadda

In la dhammeeyo IAPP waa shardi, laakiin sida uu shaqaalaha xarunta ula xiriiro qof kasta, u aqoonsado meelaha khatarta ka imani karto, uguna diyaariyo qorshe shaqsiyeed oo u gaar ah, ayaa go’aamin kara in qofka deggan uu ka qaybqaato hawsha isla markaana si daacad ah uga jawaabo su’aalaha.

Qofna ma rabo in loo arko inuu yahay qof nugul.

Haddii ay suuragal tahay, ka fogow isticmaalka ereyada sida ‘nugul,’ ‘halis,’ ama ‘tacaddi.’ Diiradda saar wada hadal iyo su’aalo kuu horseedaya in aad hesho isla jawaabaha aad u baahan tahay.

Ka fogaaw inaad si toos ah u akhrido su’aalaha ku qoran foomka, ama isticmaalka luuqad dadka deggan u fasiran karaan in ay ka dhigan tahay in madax-bannaanidoodu yar tahay ama aanay is daryeeli karin, iyo wixii la mid ah.

Ku billaaw su’aalaha adigoo waydiinaya, ‘Sidee ayaad u...?’, ‘Marka aad samaynayso...?’, ‘Muxuu u ekaan karaa marka...?’ iyo ‘Haddii qof sidan sameeyo..., sidee ayaad uga falcelin lahayd?’”

Haddii qofka deggan uu ka leexdo mawduuca ama uu bilaabo inuu aad u faahfaahiyo, ka faa’iidayso fursaddan adigoo weydiista su’aalo kale oo kaa caawin kara in aad qiimeyso khataraha ama aad hesho xog bulsheed oo dheeraad ah. Ku billaaw adigoo leh, ‘Wax badan iiga sheeg...’. Inta badan ee aad la falgasho, ayay kalsooni badan kuu yeelanayaan,

Habka Loo Wajaho

Sidoo kale adeegbixiyeyaasha waxaa lagu dhiirigelinayaa inay dib u eegaan qofka xarunta ka tirsan ee loo xilsaaray in uu la diyaariyo IAPP dadka cusub ee soo degaya xarunta. In hawshan loo dhiibo shaqaale tababaran oo xirfad leh, awood u leh inay waqti dheeri ah geliyaan, soo kordhiyo habab cusub, una helaan meel hal-abuurnimo leh sida loo weydiyo su’aalaha, waxay si weyn uga qayb qaadanaysaa in IAPP-gu noqdo mid tayo leh. Wadahadallo lala yeeshay adeegbixiyeyaasha Daryeelka La-caawiyo ee horey hawshan ugu xilsaaray shaqaalaha kalkaalinta ayaa muujiyay in IAPP-gu inta badan lagu buuxin jiray isla waqtiga qiimeynta kalkaalinta. Sidoo kale, marka hawshan loo xilsaaro kalkaalisada qaabilsan soo-dhaweynta (admitting RN), IAPP-gu waxa uu u badan yahay inuu si degdeg ah ku dhammaado oo lagu akhriyo erey-erey, sababo la xiriira culayska shaqo ee horey u saarnaa RN-ka.

Waxaa aad muhiim u ah in qofka buuxinaya IAPP-ga uu dib u eego taariikhda bulshada iyo caafimaadka ee qofka cusub ka hor inta uusan la kulmin si loogu diyaariyo IAPP-ga. Arrintani waxay ka caawinaysaa in la fahmo nooca su’aalaha la weydiinayo iyo jihada lagu hagi doono wada hadalka. In lala wadaago qofka deggan (haddii diiwaannadu aanay ka hor imaan) in taariikhdooda la akhriyay waa hab kale oo lagu hagaajin karo wada hadalka haddii loo baahdo.

Arrimo Kale oo Tixgelin u Baahan

Marka la diyaarinayo IAPP-ga goob Daryeelka La-caawiyo, waxa aad muhiim u ah in la tixgeliyo deegaanka uu qofka ku nool yahay iyo dadka si joogto ah ugu sugan goobtaas. Tusaale ahaan, ma la wadaagaa qofka deggan qolka ama qayb ka mid ah deegaanka dadka kale? Ma jiraan booqashooyin badan oo ay sameeyaan xubno qoyska ka tirsan? Ma helaa daryeel joogto ah oo ay bixiyaan shaqaalaha ama adeegbixiyeyaal dibadda ka imanaya? Sidoo kale waa muhiim in la ogaado haddii qofka deggan uu la falgalo dadka nugul ee ku jira xarunta, sida dadka kale ee

waayeelka ah ee qaba dhibaatooyin xagga garashada ama jir ahaaneed. Su'aalaha hoose waxaa loo habeynayaa iyadoo lagu salaynayo sida uu u egyahay qaabka uu qofku u nool yahay iyo dadka uu si joogto ah ula macaamilo.

Su'aalo Tusaalooyin Ah

Tacaddiga ay Dadka kale u Geystaan

- S. Maxaad samayn lahayd haddii aad dareento in aanad badbaado ku jirin?
- S. Ma leedahay xiriirro adiga kuu muuqda kuwo ammaan ah? Ka warran kuwo aan ammaan ahayn? Sidee bay u egyihiin ama u ekaan lahaayee?
- S. Ma jirtaa qof aad ka walwalsan tahay inuu kugu soo booqdo gurigaaga cusub?
- S. Haddii aad dukaanka joogto oo qof aanad aqoon uu kuu sheego inuu rabbo inuu isticmaalo taleefonkaaga ama uu lacag kaa amaahdo, maxaad u malaynaysaa inaad samayn lahayd?
- S. Haddii aad diido, oo uu bilaabo inuu ku qayliyo ama ku hanjabo, maxaad samayn lahayd?
- S. Marnaba ma dhacay in qof sidaas kuula dhaqmo? Sidee bay taasi kuu ahayd?
- S. Ma jeceshahay inaad la kulanto dad cusub? Sidee ayaad u samaysaa taas? Ma xiriir jacayl ayaad leedahay ama waad shukaansataa? Sidee bay taasi u egtahay?

Tacaddiga ama dhib u geysiga dadka kale

- S. Ma jeceshahay inaad dadka la joogto, mise inta badan adigaa kaligaa jooga?
- S. Marnaba ma ku lug yeelatay muran jireed ama mid afka ah? Haddii haa, qofkee ayey la ahayd?
- S. Ma si wanaagsan ayaad ula dhaqantaa qoyskaaga?
- S. Ma ii sheegi kartaa wax ku saabsan xiriirradii aad hore u soo martay? Kuwa caafimaadka qaba? Kuwa aan caafimaad qabin?
- S. Marnaba ma ku jirtay dagaal? Sidee ayuu u ekaa dhacdadaasi?
- S. Marnaba ma soo wadaagtay guri qof kale (roommate) ahaan? Sidee bay u dhacday?
- S. Hore ma ugu nooleyd meel dad badan wada deggan yihiin (communal living)? Sidee bay u egtahay nolol noocaas ah, maxaase kuu ahaa caqabadaha kuugu waaweyn?
- S. Marnaba ma ku adkaataa inaad deggenaato oo aad is dejiso? Taasi ma wax ayaad hadda ka shaqaynaysaa inaad hagaajiso?

Is-dhibaateynta (Tacaddiga qofka naftiisa u geysto)

- S. Sidee ayaad u qorsheynaysaa inaad bulshada uga faa'iidayso ama adeegyada uga gaarto? Sidee ayaad u mari doontaa meelaha aad u baahan tahay?

S. Ma jiraan waxyaabo aad ka walwalsan tahay marka aad habeenkii kaligaa dibadda uga baxdo aaggaan?

S. Marnaba ma dhacay inaad lumto ama dhaawacanto adigoo dibadda jooga? Ma isticmaashaa qalabkaaga (tusaale kursiga curyaamiinta, bakooradda, iwm.)?

S. Sidee bay u muuqataa marka aadan qaadan daawooyinkaaga? Ma jiraan calaamado lagu garan karo?

S. Sidee ayaad u maamushaa daawooyinkaaga? Marnaba ma dhacday inaad badsato daawo ama aad gabi ahaanba joojiso qaadashada daawooyinka?

S. Ma u malaynaysaa inaad si wanaagsan u garan karto marka ay caafimaadkaaga dhimirka dhibaato kaa haysato, sida murugo ama niyad-jab? Marnaba ma ku soo dhacday fikir ah in aad is-dhaawacdo?

S. Ma u malaynaysaa inaad si kaligaa ah ugu kalsoon tahay maareynta arrimahaaga maaliyadeed? Haddii loo baahdo, ma leedahay qof aad ku kalsoontahay oo kaa caawin kara go'aamada maaliyadeed? Ma ogtahay khiyaamooyinka lagu beegsado dadka waayeelka ah (sida in lacag lagu waydiisto, farriimaha iimayl-ka ee khiyaanada ah)?

S. Ma u malaynaysaa inaad si fiican naftaada u daryeesho? Maxaad u aragtaa inay muhiim u tahay is-daryeelka?

S. Si joogto ah ma u cuntataa oo ma u dhaqataa? Ma jiraan meelaha is-daryeelka oo horey kugu adkaaday?

S. Ma haysataa cunto ku filan oo aad si habboon u heli karto?

Dib-u-eegista IAPP

IAPP-ga waa dukumeenti isbeddelaya oo mar kasta u baahan in kooxda daryeelku dib u eegto oo wax ka beddesho marka ay dhacaan dhacdooyin, isbeddel ku yimaado xaaladda qofka deggan, ama duruufo kale oo cusub. Kooxda waa inay sii wada shaqo-wadaagga dukumeentiga iyaga oo la kaashanaya qofka deggan marka la aqoonsado nuglaansho cusub ama ay wax ka beddelmaan kuwii hore, si uu qorshaha had iyo jeer ugu ekaado baahiyihiisa hadda.

Minnesota Department of Health
Health Regulation Division
PO Box 64579
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-4200
health.fpc-web@state.mn.us
www.health.state.mn.us

01/5/26

Si aad u hesho macluumaadkan oo ku qoran qaab kale, wac: 651-201-4200.